

# Tijaabo-qaadis wadareed ayaa la ballaarinayaa si bulshada dib loogu furo

Tijaabo-qaadis wadareed (*masstesting*) badan ayay dawladdu samayn doontaa si bulshada dib loogu furo. Mudnaanta koowaad na waxaa la siin doonaa carruurta iyo dhallinyarada ku sugan meelaha uu cudurku ku badan yahay. Agaasinka caafimaadka ayaa mas'uul looga dhigay nidaam dalka oo dhan gaarsiisan oo dadka si wadar ah tijaabo looga qaadayo, isagaana hubinaya in qalabka si waxtar leh loo isticmaalo iyo in hawsha si wanaagsan la isugu duwo.

- Kala-qaadista cudurka ee Norway weli way badan tahay. Tijaabo-wadareedka ayaa noqon kara aalad muhiim oo lagu ogaan karo meelaha uu cudurku ku badan yahay iyo sidii Norway degdeg dib loogu furi lahaa. Waxaan hadda samaynaynaa nidaam dalka oo dhan gaarsiisan oo dadka si wadar ah tijaabo looga qaadayo. Waxaan marka hore mudnaanta koowaad siin doonaa carruurta iyo dhallinyarada ku sugan meelaha uu cudurku ku badan yahay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynuhu waxay garteen in tijaabo-wadareed joogto ah oo laga qaado kooxo gaar ah, halkaas oo dadka laga helo cudurku ay gooni uga baxayaan dadka kale islamarkaana raadraac lagu samaynayo is qaadiinta cudurka, ay cudurka yarayn doonto. Tusaale ahaan waxaa tijaabo-wadareedka loo isticmaali karaa sidii ay iskoollada, machadyada iyo jaamacaduhu ugu furnaan lahaayeen hab macquul ah marka la eego ka hortagga faafidda cudurka.

## **Carruurta iyo dhallinyarada ayaa u horreynaya**

Tijaabo-wadareed, oo laga wado in koox dad ah si habaysan tijaabo looga qaado ayada oo aan loo eegayn in qofka looga shakisan yahay in uu cudurka qabo ama xanuunsan yahay, ayaa ah nidaam ay haddaba waddammo badan adeegsadaan.

Norway waxaa ka socda dhawr tijaabo-wadareed oo hordhac ah, sida iskoollada iyo jaacamadaha Oslo iyo Bergen.

Nidaamka dalka oo dhan gaarsiisan wuxuu ka koobnaan doonaa 3 weji. Waxaa mudnaanta koowaad la siinayaa carruurta, dhallinyarada, ardayda jaamacadaha iyo shaqaalaha iyo waalidka dugsiyada hoose iyo xannaanooyinka carruuraha. Wejiga 1aad waxaa soo hoos gelaya xaafadaha iyo degmooyinka uu cudurku ku badan yahay, ee u dhigma heerka khatarta 5aad ee FHI. Wejiga 2aad waxaa soo hoos gelaya xaafadaha iyo degmooyinka u dhigma heerka khatarta 4aad ee FHI. Wejiga 3aad kuwa soo hoos gelaya gadaal ayaa laga soo sheegi doonaa.

- Agaasinka caafimaadka ayaa mas'uul looga dhigay hoggaaminta hawshaan ayada oo ujeeddadu tahay in si fiican looga faa'iideysto khayraadka xaddidan sida qalabka tijaabo-qaadka, iyo in la helo isu duwid wanaagsan. Agaasinka ayaa tusaale ahaan go'aamin doona mararka la qaadayo tijaabo-wadareed, hubinaya in la helo qalab tijaabo-qaad oo ku filan iyo in ay degmooyinka xiriir fiican la yeeshaan, ayuu yiri Høie.

### **Wuxuu noqonayaa mid ikhtiyaar loo dooranayo**

Tijaabo-wadareedka ikhtiyaar ayaa loo dooranayaa, haddii ay ahaan lahayd degmada iyo qofka gaarka ah labadaba. Carruurta waxaa loo baahan doonaa in ay waalidku oggolaadaan.